# Waa maxay WIDA Screener?

WIDA Screener waa imtixaan ka caawiya macallimiinta in ay aqoonsadaan haddii ardayda fasallada K–12 ay yihiin arday Bartayaasha afka Ingiriska ah. Bartayaasha afka Ingiriska waa arday si rasmi ah loo aqoonsaday inuu u baahan yahay taageero luqadeed si uu si guul leh ugu fahmo uuna la jaanqaado maaddooyinka waxbarasho ee ku baxa af Ingiriisiga.

## Maxaa looga Qaadayaa Ilmahayga Imtixaanka WIDA Screener?

Waxaad ka qayb gashay sahamin aad kaga jawaabtay su'aalo ku saabsan luqadda aad kaga hadasho guriga. Marka la eegay jawaabahaaga, macallimiinta carruurtaada waxay u maleynayaan in ilmahaagu laga yaabo inuu yahay arday Baranaya af Ingiriiska. Imahaagu wuxuu u sameenayaa WIDA Screener in lagu xaqiijiyo hadeey yihiin kuwa baranaya luuqada Ingiriisiga.

## Sidee Loo Adeegsadaa Natiijooyinka Imtixaanka WIDA Screener?

Natiijooyinka imtixaanka WIDA Screener waxaa adeegsada macallimiinta ilmahaaga si ay uga go'aan gaaraan haddii ilmahaagu yahay arday Baranaya af Ingiriis.

## Imtixaanka WIDA Screener muddadiisu waa intee?

Imtixaanku wuxuu qaadan kara ilaa 80 daqiiqo in la dhammeeyo, inkastoo wakhtiga imtixaanku kala duwanaan karo iyadoo ku xiran baahida gaarka ah ee ardayga iyo heerka aqoontiisa af Ingiriisiga. Su'aalaha imtixaanka WIDA Screener waxay daboolayaan afarta qaybood ee luqadda (Dhageysi, Akhris, Hadal, iyo Qoris).

Ardayda badankooda ee fasallada 1–12 waxay sameeyaan imtixaan onlayn ah (iyadoo ku xiran siyaasadda gobolkaaga). WIDA Screener ee ardayda fasalka barbaarinta waa imtixaan gaaban oo lagu sameeyo iyadoo la adeegsanayo qalin iyo warqad.



WIDA UNIVERSITY OF WISCONSIN–MADISON

WIDA waxay ku taal Xarunta Cilmi-baarista Waxbarashada ee Wisconsin ee Jaamacadda Wisconsin-Madison.
© 2025 Board of Regents of the University of Wisconsin System, on behalf of WIDA

## U Diyaargarowga WIDA Screener

- Ilmahaagu uma baahna inuu wax u barto imtixaanka WIDA Screener.
- Ilmahaagu waa inuu diiradda saaraa inuu dadaalkiisa ugu fiican muujiyo maalinta imtixaanka si uu u tuso dhammaan siyaabaha uu u fahmo uguna hadli karo af Ingiriis.
- Kala hadal macallimiinta ilmahaaga goorta aad heli doonto natiijooyinka imtixaanka iyo sida iskuulka ilmahaaga u adeegsado natiijooyinkaas.

## Haddii ilmahaagu yahay Barte Ingiriisi, Halkan waxaa ah su'aalo aad weydiin karto macalimiintooda



- Waa maxay nooca adeegyada taageerada luqadda Ingiriisiga ee ilmahaygu ka heli doono dugsiga?
- Sidee baa luqadaha iyo dhaqamada carruurta loogu dhex-dhafaa dugsiga?
- Sidee qoyskaygu ugu taageeri karaan horumarinta luqadda ilmaheena guriga?
- Goorma ayuu ilmeygu joojin doonaa helitaanka taageerada luqadda Ingiriisiga?

WIDA™
UNIVERSITY OF WISCONSIN–MADISON

WIDA waxay ku taal Xarunta Cilmi-baarista Waxbarashada ee Wisconsin ee Jaamacadda Wisconsin-Madison.
© 2025 Board of Regents of the University of Wisconsin System, on behalf of WIDA